

Aabbayaasha iyo Adeegyada Daryeelka Ilmaha

Ma ogtahay?

Australia sanad walba in ka badan boqol kun oo rag ah ayaa noqda aabbe markii ugu horreeyey. Midaani waa wax aad xiisa u leh laakiin waxay u muuqataa hawl aad u siyaada u ah.

Maanta, aabbayaal badan ayaa aad uga qaybqaata masuuliyada waalidnimada si ay u bixiyaan jawi ku dheehan kalgacal, amaan iyo naxariis kaas oo ilmahoodu ku kori karo waxna ku baran karo. Aabbayaashu waxay noqonayaan kuwa aad u og waxa ficilkoodu ku soo kordhinayo caafimaadka iyo samaqabka ilmahooda iyo qoyskooda guud ahaan.



Maxaa nimanku ka rabaan adeega ilmaha?

Guud ahaan waxaa jira cilmi baaris aad u kooban oo laga sameeyey Australia waxa nimanku ka filanayaan adeega daryeelka ilmaha, sidoo kale wax yar ayaa laga ogyahay in raggu rabaan wax ka duwan waxyaallaha dumarku rabaan. Waxaa jira waxyaallo guud oo la daabacay oo muujinaya waxa raggu door bidayaan:

- xarakaadyo badan oo hawl lagu qabanayo si kor loogu qaado sheekada laguna siinayo siday uga qaybqaadan hawsha bulshada/qoyska.
- Macluumaad badan oo wax-qabad iyo talo ah— waxay doonayaan inay ka tagaan adeeg leh wax si cad loo fahmi karo oo la qabanayo si loo dhameeyo arrin.
- in aan lala samayn cilaqaad muddo dheera shakhsiyadka adeega ku jira.
- in aan loola dhaqmayn si khaasa, ama kaalmayn, ama lala kulmayo dabeecado u hogaaminaya inay aaminaan in aan carruur lagu aamini karin.

Sidee liistadaan guud oo waxa raggu rabaan markay la xaallayaan adeega daryeelka ilmaha aad u dhinac dhigi lahayd waxaad samayn lahayd?

Kala shaqaynta adeega daryeelka ilmaha caafimaadka iyo samaqabka ilmahaaga

- waa muhiim inaad dareento in lagugu soo dhowaynayo uuna ku kaalmaynayo adeega daryeelka ilmaha ee uu tago ilmahaagu. Waqti qaado si aad u siiso daryeellayaasha rayi-celin wixii ku saabsan soo dhowaynta iyo kaalmaynta.
- isku day inaad soo jeediso talo wax ku oolla oo ku saabsan wixii la samayn karo si horay loogu sii wado in lagugu kaalmeeyo doorka aabbanimada.
- waxaad hawl wadaag la tahay adeega daryeelka ilmaha. Uga faaiidayso sida ugu fiican fursadaha la bixiyey ama abuur fursadaha aad u baahan tahay inay kugu caawimaan doorka aabbanimada.
- Daryeellayaashu waa halka ugu fiican oo laga helli karo macluumaadka ilmahaaga. Had iyo jeerna waxay doonayaan inay kula qaybsadaan waxyaallaha ilmahaagu maalintaas sameeyey iyo inay muujiyaan waxa ilmahaagu xiisaynayo, iyo wuxuu aad jecel yahay. Weydii talo dhab ah iyo fikrad soo jeedin ku saabsan xarakaadyada guriga lagula sameeyo ilmahaaga.
- waxaad yeellan kartaa shabakad kaalmo oo aad u sarraysa oo ah qoysaska isticmaala adeega si aad u qorshaysaan xarakaad “aabbe” iyo/ama qoys si ay kuugu suurta gasho inaad la kulanto aabbayaal iyo waalid kale.

Xaashidaan xaqiiqada waalidka waxaa la ballaa iyadoo ku qoran luqada badan oo jaalliyaduhu ku badlaan waxaana lagala soo bixi karaa websaytka Early Childhood Connections oo ah www.ecconnections.com.au

Dadaalka

Waxaa taageeray

